

Shaashada kansarka xiidmaha waaweyn ee baaritaanka Cologuard®

Baaritaanka Cologuard waxaa caymiyo Medicare iyo caymis-bixiyeyaasha waaweyn badankood.

\$0 Bukaanaada caymiska haysto badankoodu **\$0** ayay ku bixiyaan baaritaanka Cologuard^{1*}

96% Wadanka oo dhan, in ka badan **96%** bukaannada Cologuard ma bixiyaan kharash jeeb ka-bixin ah oo loogu talagalay baaritaanka^{1*}



Wax dheeri ah ka baro Cologuard.com/insurance ama wac **1-844-870-8870**. Waxaan kaa caawin karnaa inaad shirkaddaada caymiska weydiiso su'aalaha saxda ah.

Caymis-bixiyeyasha badankood waxay caymiyaan baaritaanka lagu eegayo xiidmaha waaweyn ee daba-galka ah kadib marka baaritaanka Cologuard muujiyo cudurka.^{2,3†}


Baaritaanka Cologuard waa mid fudud oo lagu isticmaali kara guriga

Tilmaamo fahfaahsan oo dhamaystiran ayaa kujira Sanduuqa Cologuard




Fiidiyowga Sida Loo Istimaaalo:
Cologuard.com/use

1 FADHIISO




- Istimmaal baaritaanka Cologuard markaad diyaar u tahay.
- Weelkaaga muunada ee cad dul saar musqusha.
- Ku fadhiiso musqusha.

2 XOQ




- Ku xaar gudaha weelka muunada ee cad.
- Saxaradaada (xaarka) ul ku xoq oo ku rid tuubada la timid xirmada baaritaanka.

3 QOOY & XIR



- Weelka muunada ka buuxi dareeraha horjoogsado qurmidda.
- Xir weelka weyn iyadoo muunadaada ay gudaha ku jirto.

4 CALAAMADEE & DIR



- Buuxi labo goobood ee qoraalka/calaamada.
- Xirmada baaritaanka ku soo celi Exact Sciences adigoo adeegsanayo UPS®.



Muunaddaada ku soo celi qaab bilaash ah


1. Qaadista UPS ka jadwaleyso Cologuard.com/UPS ama soo wac **1-844-870-8870**
2. Xirmadaada baaritaanka u gee UPS. Dukaamada maxalliga ah iyo saacadaha alaab geynta ka hel Cologuard.com/UPS

^{*} Qiyaasta dhowaan ah ee Exact Sciences ee ku salaysan biilasha bukaanka ee taariikhiga ah.

[†] Bukaanaada intooda badan, tani waxay dhaqan gali doontaa 1-da Janaayo, 2023, mana khasayso qorshayaasha ganacsi ee leh ka-reebitaanka.^{2,3}

Natijjooyinka baaritaankaaga Cologuard

Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa helayo natijjooyinkaaga 2 usbuuc kadib marka ay Exact Sciences helaan muunadaada.



Baaritaanka Cologuard wuxuu eegaa **DNA beddelmay** iyo **dhiig** (calaamadaha kansarka) kujira saxaradaada⁴



Natiijo taban ayaa ka dhigan in baaritaanka Cologuard uusan muujin calaamadaha kansarka ee suurtagalka ah.

Waxay u badan tahay inaad qabin kansarka mindhicirka iyo malawadka.⁴



Natiijo togan ayaa ka dhigan in baaritaanka Cologuard uu muujiyay calaamadaha kansarka ee suurtagalka ah. Naatijada togan ka **ma** dhigno inaad qabto kansar.⁴ Ballan dabagal ah la yeelo bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Dadka qaarkiis waxay helaan natijjooyin togan iyo kuwo taban oo been ah (khaldan). Had iyo jeer weydii bixiyahaaga daryeelka caafimaadka tallaabooyinka xiga ee baaritaanka.⁴

Macluumaad dheeri ah iyo muuqaalo ka hel:
Cologuard.com/UnderstandingResults

Tilmaamaha iyo Macluumaadka Halista ee Muhiimka ah

Cologuard waxaa loogu talagalay in lagu baaro dadka waaweyn ee da'doodu tahay 45 jir iyo ka weyn kuwaas oo halis dhexdhexaad ah ugu jira kansarka mindhicirka iyo malawadka iyada oo la eegayo inay jiraan qaar ka mid ah calaamadaha DNA-ga iyo in dhiig uu ku jira saxarada. Ha isticmaalin haddii ay hore kaaga soo baxday buro aan kansar ahayn, aad qabtid cudurka hurgumka/caabuqa mindhicirka iyo cilladaha la iska dhaxlo qaar, ama aad taariikh shakhsiyeed ama qoyseed u leedahay kansarka mindhicirka iyo malawadka. Cologuard bedel uma aha baaritaanka lagu eego xiidmaha waaweyn marka la baarayo bukaanada halista sare ugu jira cudurka. Waxqabadka baaritaanka Cologuard ee dadka waaweyn ee da'doodu u dhaxayso 45-49 ayaa la qiyaasaa iyadoo lagu saleynayo daraasad caafimaad oo ballaaran oo lagu sameeyay bukaano ah 50 jir iyo ka weyn.

Natiijada baaritaanka Cologuard waa in si taxadar leh loo fasiraa. Natiijada togan ee baaritaanka ma xaqiijineyso jiritaanka kansarka. Bukaana leh natijada togan ee baaritaanka waa in loo gudbiyaa baaritaanka lagu eego xiidmaha waaweyn. Natiijada taban ee baaritaanka ma xaqiijineyso maqnaanshaha kansarka. Bukaana leh natijada taban ee baaritaanka waa inay dhakhtarkooda kala hadlaan goorta ay u baahan yihiin in mar kale la baaro. Natiijooyin togan oo been ah iyo natijjooyin taban oo been ah ayaa dhici kara. Xili la sameeyay daraasad caafimaad, 13% qof oo aan kansar qabin ayaa waxay heleen natiijo togan (natiijo togan oo been ah) iyo 8% qof oo kansar qaba ayaa waxay heleen natiijo taban (natiijo taban oo been ah). Rx keliya.

Tixraacyada: 1. Exact Sciences. 2022. Taariikhda faylka. 2. Su'aalaha la isweydiyo ee ku saabsan Dhaqangelinta Sharciga Daryeelka La Awoodi karo Qaybta 51, Sharciga Gurmadka Koronofayraska ee Mudnaan-Siinta Qoysaska iyo Sharciga Hirgelinta Kaalmada, Gargaarka, iyo Sugnaanta Dhaqaalaha ee Koronofayraska. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka. La daabacay Janaayo 10, 2022. La gelay Maayo 2, 2024. <https://www.hhs.gov/guidance/document/faqs-about-affordable-care-act-implementation-part-51>. 3. CMS. Jadwalka kharashka dhakhtarka Medicare ee kama dambeysta ah ee Sannad kalandarka (Calendar year, CY) 2023. La daabacay Noofimbar 1, 2022. La gelay Maayo 2, 2024. <https://www.cms.gov/newsroom/fact-sheets/calendar-year-cy-2023-medicare-physicianfee-schedule-final-rule>. 4. Exact Sciences. 2022. Buug-yaraha Bukaanka ee Cologuard.

EXACT SCIENCES CORPORATION | 5505 Endeavor Lane, Madison, WI 53719
ExactSciences.com | ExactLabs.com | 1-844-870-8870

Cologuard iyo Exact Sciences waa summadaha ganacsi ee ka diiwaangashan ee Exact Sciences Corporation.

Dhammaan summadaha ganacsi ee kale waa hantida milkiilayaashooda.

© 2024 Exact Sciences Corporation. Dhammaan xuquuqaha way dhowrsan yihiin.

M-US-CG-05199-Somali



**EXACT
SCIENCES**